


Tusaha Qoyska ee

Barashada Baaskiilka





Barashada Baaskiilku (Bike Ed) waa barnaamij loo sameeyey carruurta dugsiga hoose si ay u bartaan sida wadada si nabad ah loogu kaxeeyo baaskiilka. Barnaamijka waxaa ku jira xarakaadka wadida oo ku salaysan fasalka, laakiin waxay u baahan yihiin kaalmada waalidka/daryeellayaasha si ay ugu guulaystaan baaskiil kaxaynta.

Bike Ed waa barnaamijka waxbarashada baaskiilka ee dugsiyada hoose oo ay ansixisay Horumarinta Ilmanimada Hore ee Wasaarada Waxbarashada (DEECD). Barnaamijka waxaa samayey VicRoad waxaana taageeray Horumarinta Ilmanimada Hore ee Wasaarada Waxbarashada (DEECD).

Waalidiintu/daryeellayaashu waxay cayaari karaan door muhiima xagga kaalmaynta kaxaynta baaskiilka. Waa inay xaqiijiyaan in ilmahoodu haysto waqti fiican, isaga oo qof weyni kaalmaynayo, si ay ugu celiyaan xirfada lagu baro dugsiga. Waalidiintu/ daryeellayaashu waxay ku tabaruci karaan inay kaalmeeyaan samaynta barnaamijka barashada baaskiilka ee barnaamijka dugsiga ilmaha. Waxay kaloo samayn karaan tababarka macalinka ee barashada baaskiilka iyada oo uu bixinayo tababar bixiye ay aqoonsan tahay DEECD. Faahfaahinta barnaamijyada la helli karo booqo:

www.education.vic.gov.au/studentlearning/programs/traffic

TUSMADA BUUGGA

Maxaa baaskiil loo wadaa?	1
Sidee carruurta ku baran kartaa nabad ku kaxaynta baaskiilka?	2
U kaxaynta baaskiilka si nabad ah	3
Samaynta baaritaan sahlan oo amaanka baaskiilka	3
Tusaalayaasha gadashada baaskiilka cusub	8
Qaadashada qalabka saxda ee baaskiil kaxaynta	9
Koofiyada baaskiilka- Gadashada koofiyadu waa muhiim	9
Xafidida koofiyadaha	9
Meelaha lagu wado baaskiilka	10
Dhar noocee ah ayaa la xiranayaa	10
Ku wadida dhabada- si amaana ula wadaagida kuwa kale	12
Ixtiraamka dhabooyinka	13
Khataraha dhabooyinka	13
Meelaha lagu wadayo	14
Wadajir u fuulida	14
Barashada si amaana ugu wadida wadada	16
Hababka lagu caawimo diyaarinta carruurta si ay wadada ugu	
wadaan baaskiilka si amaana	16
Waxyaallaha laga hubinayo amaan ku kaxaynta wadada	17
Websaytyada la xiriira	19

Maxaa baaskiil loo fuullaa?

Baaskiiladu bay'ada waa u fiican yihiin, waana wax ku ool in lagu safro caafimaad ahaan. Baahida loo qabo in hoos loo dhigo gaaska hawada gelaya darteed, baaskiilada ayaa ah kuwa lagu bedeli karo gaadiid ahaan baabuurta. Baaskiilada waa wax fiican oo lagu safri karo, khasatan meelaha dhowdhow.

Si joogto ah u wadida baaskiilka ayaa iyaduna ah wax caafimaadka carruurta iyo qoyska oo dhan lagu wanaajin karo.



Sidee carruurta ku baran kartaa nabad ku kaxaynta baaskiilka?

Ka hor da'da 12 jirka ah waa in aan ilmaha loo ogolaan inuu ku kaxeeyo baaskiilka wadada iyada oo aan qof weyni kormeerayn. Xataa markay ku wadaan wadada lugta iyo dhabada baaskiilka waxaana jira mar loo baahan yahay in wado la gooyo. Xaqiiqadu waa carruurta badankeed, ilaa laga gaarayo da'da 12aad, ma yeellan xirfadaha muhiimka ah oo ilmuhu ku awoodo inuu ugu kaxaysto baaskiil si amaana meela baabuurtu marayso. Si carruurta u yeeshaan xirfadaan waxay u baahan yihiin caawimo badan iyo tababar iyaga oo ay koreemayaan dad waaweyni.

Carruurta waxay baran karaan kaxaynta iyaga oo aad u yar waxayna ku daydaan dabeecadaha waalidkood/daryeellayaashooda marka laga hadlayo dhinaca amaanka baaskiilka.

Waalidiintu/daryeellayaashu waxay iyaguna caawimi karaan in carruurtoodu barato baaskiilka iyaga oo fursad siinaya yeelashada xirfad inta barnaamijkaan lagu jiro.

Waa muhiim in waalidiintu/daryeellayaashu xaqiijiyaan in qoyska oo dhami:



- ay qaataan koofiyada la ansixiyey ee baaskiilka lagu kaxeeyo
- ay qaataan lebis muuqda oo iftiimaya si dadka kale oo wadada isticmaalayaa u arkaan
- ay baaskiiladooda ka dhigaan kuwa hagaagsan
- ay si amaana u raacaan dhamaan shuruucda wadada.

U kaxaynta baaskiilka si nabad ah



Samaynta baaritaan sahlan oo amaanka baaskiilka

Baaritaan sahlan oo joogto loo sameeyaa waa in la smaeeyaa. Carruurta baaskiiladoodu waa inay ahaadaan qiyaasta saxda ah lagana hubiyaa meelaha lagu iibiyo si loo xaqiijiyo in dhamaan qalabku u shaqaynayo si wax ku oolla.

Qiyaas

Kaxaynta baaskiil aad u yar ama aad u weyn wuxuu ilmaha u keeni karaa inuu lumiyo kantaroolka kaxaynta wuxuuna sababi karaa dhaawac. Baaskiilku waa inuu ilmaha le'eg yahay si uu lugahiisa ula gaaro dhulka. Baaskiilka wadida, inta u dhexaysa birta kursiga haysa iyo tan isku xirta labada qaybood oo baaskiilka (ama halka qofku ahaanayo) waa inay ahaataa 3 sentimitir, baaskiilka buuraha ee loo yaqaan BMX-kana waa in uu ahaadaa 5-10 sentimitir.



Kursiga

Kursiga baaskiilku waa in aanu janjeerin ama dhinacna u dhaqaaqayn ama lahayn dhaawac, sida dilaac ama moolooyin jaban. Haddii ciladahaani jiraan waa in la bedelaa. Waa in kursigu u yaallaa si la siman tuubada kore. Jirrida kursigu ma aha inay ku fadhido meesha ugu saraysa.



Tusaalayaasha amaanka

Carruurta ka yar 12 sanadood maaha inay baaskiilka wadada ku wadaan iyada oo aan qof weyni la socon.



Shukaanta

Shukaanta baaskiilka oo sawirka ka muuqata waa in la daboollaa, marka geesuhu aanay daboolayn ilmaha waa dhaawici karaan haddii ay la dhacaan baaskiilka, meelaha shukaanta la qabanayana waa in la xejiyaa oo aanay debecsanayn. Marka lagu fadhiisto, qofka kaxaynaya gacmihiisu waa inay xoogaa leexsan yihiin marka la qabanayo shukaanta ruugaguna maaha inay ku dhacaan shukaanta.



Aallada digniinta

Waa arrin sharci ah in baaskiilku leeyahay gambaleele iyo hoon shaqaynaya oo si waadax ah loo maqli karo. Aalladahan digniinta ah waxaa loo isticmaalaa in loogu dego kuwa kale oo wadada isticmaalaya oo baaskiilku ku soo socdo.



Tusaalayaasha amaanka

Waxaa lagu talinayaa in carruurta aanay wadin baaskiil habeenkii, khatarta ka iman karta darteed.



Joojiyayaasha

Waa arrin sharci ah in dhamaan baaskiiladu ay leeyihiin bareeg dambe iyo mid hore. Marka bareega la qabto, maaha in aanay shaagagu leexan, waa in ay jirtaa masaafu u dhexaysa bareega iyo shukaanta.

Carruurta badankeed shilkooda baaskiil wuxuu la xiriiraa gaari yar ama gaadiid nooc kale ah. Kaxeeyaha oo aan khibrada lahayn khatartana iska eegayn ayaa badanaa sababta shilka keena.



Tusaalayaasha amaanka

Ku celcelintu way saxdaa. Baaskiilka la wad ilmahaaga marka uu baranayo xirfada baaskiil wadida. Ku dhiiranow, kuna raaxayso baaskiil wadida.

Marka carruurta ay saaxiibo la wadaan, feejignaantoodu waxaa laga yaabaa in aanay fiicanayn baaskiil wadidooduna amaan ahayn.

Garangarta iyo taayirada

Eeg garangar debecsan ama loolal (spokes) jaban. Hubi in garangartu si xor ah u wareeganayso. Hubi in taayiradu aanay dhamaan hawona ka buuxdo. Marka la riixo, haddii taayirku buuxo, hoos u degi mayo. Hawada lagu shubayo qiyaasteeda waxaa lagu xardhay taayirka dushiisa.



Xawaare-sameeye

Eeg labada aalladood oo xawaaraha ama socodka sameeya in aanay go'in ama xumaan si xor ah ahna u wareegayaan markaad gacantaada ku qabato. Hubi in xawaare sameeyaha aanu debecsanayn oo halka uu ku dhegan ku adag yahay.





Degdeg u siidaynta

Hubi in habka kasta oo degdeg lagu sii daayo giraanta ay adag tahay korna loo laabo.

Silsilad

Hubi in silsiladu nadiif tahay, una shaqaynayso si aan hakad lahayn oo aanay debecsanayn. Xoogaa saliid yar mari kana ilaali in aan daxal fuulin.



Goorma ayaa nalalka loo baahan yahay?

Wadida baaskiilka habeenimada ama xaallad hawo oo yaranaysa aragtida lagu talin mayo in la wado baaskiil. Sharci ahaan baaskiil kasta oo la fuullo waqtiyadaas waa in lagu dhejiyaa nalal shaqaynaya. Waxaa waajib ah inuu jiro nal cad iyo nal guduudan oo banaanka ah oo labadaba laga arki karo ilaa 200 mitir. Baaskiilada waa in iyagana lagu dhejiyaa dhalaale guduudan oo gadaal ku xiran kaas oo ka muuqda ilaa 50 mitir.


Xasuuso: bareegyada, taayirada iyo kuwa degdeg loo sii daayo waxaa waajiba in la hubiyo ka hor intaan la kaxayn.



TUSAALAYAASHA LOO BAAHAN YAHAY MARKA BAASKIIL CUSUB LA GADANAYO

BAASKIILADA WAXAA LOO BAAHAN YAHAY INAY YIHIIN KUWA KU HABOON WADAHA CABIR AMA QIYAAS AHAAN. IN BAASKIIL ILMA LOO GADO 'SI LU UGU KORO' WAA KHATAR.

ISTICMAAL MACLUUMAADKA TUSAHAN. RAADINA TALADA DADKA IIBIYA OO HADALKOODU LOO QAATEEN YAHAY KUWAAS OO KAA CAAWIMI DOONA INAAD SAMAYSO GO'AANKA SAXDA AH.



Fikradaha xarakaadka qoyska

- Xasuusi waxyaalaha muhiimka ah ee ay tahay in la hubiyo. Isticmaal macluumaadka tusahaan lagu bixiyey.
- Ka caawi carruurta inay hubiyaan liiska-hubinta amaanka ee baaskiilka. Weydii waxay tahay in lagu daro. Isticmaal macluumaadka lagu bixiyey tusahaan si ay u caawimaan. Liiska-hubinta waxaa lagu muujin karaa halka baaskiilka qoyska la dhigo.

Qaadashada qalabka saxda ah si baaskiil loo kaxeeyo



Tusaalayaasha amaanka

Waxaa lagu talinayaa in carruurta ka yar 12 sanadood ay ku wadaan dhabada. Haddii ay ku kaxaynayaan wadada waxaa waajib ah in had iyo jeer uu kormeerayo qof weyni, maadaama aanay yeellan xirfadaha lagu wado wadada si madax banaan oo amaana ah mar walba.

Koofiyada baaskiilka – waa muhiim

Waa khasab in la xirto koofiyada baaskiilka marka la wado baaskiilka.

Sharci ahaan qof kasta oo baaskiil wada (iyo qofka la saarana) waxaa waajib ku ah inuu xirto koofiyadaha baaskiilka la ansixiyey waa inay leeyihiin Mustawaha Australia oo sumadiisu tahay AS/NZS 2063.

Dhaawaca madaxa ayaa ah waxyaallaha ugu badan oo keena shilalka dadka baaskiilka kaxeeya, sidaas darteed qaadashada koofiyad cabirkaaga ah si fiicana u le'eg madaxaaga ayaa ka difaaci karta ilmahaaga madaxiisa dhaawac madaxa ku dhaca naftana badbaadin kara.

Iyada oo qayb ka ah Barnaamijka Waxbarashada Baaskiilka, waa in la hubiyaa koofiyada baaskiilka carruurtana waxaa la tusaa sida loo saxo loona xirto koofiyada.

Waa muhiim in qof walbaa qaato koofiyad marka baaskiilka marna lagu wadayo marna lagala degayo wadada. Waxaad tahay qofka ugu fiican oo ilmuhu ku dayan karaan sidaas darteed isku day inaad hogaamiso.

Gadashada koofiyad

Waa muhiim inaad gadato koofiyad si sax ah kuu le'eg. Ha u gadin koofiyad ilmuhu 'uu ku koro'. Koofiyadu waxay ku timaadaa qaabab, qiyaaso iyo



Tusaalayaasha amaanka

Waa fikrad wanaagsan inaad koofiyadaada u deyso baaskiilka si uu kuugu noqdo xasuusiyaha koofiyad qaadashada.

midabyo kala duwan, qaababka qaarkood ayaana le'ekaanaya madaxyo kala duwan si ka fiican siyaallo kale.

Koofiyada qiyaasta saxda ahi waa inay ugu fadhiistaa madaxa ilmaha si sax ah iyada oo aan u guurguurayn dhinacna. Koofiyada aan si fiican madaxa u le'ekayn ma aha amaan, maadama ay ka dhici karto ama ka duulli karto madaxa marka shil dhaco.

U dhaaf carruurto ha doordeen koofiyada ay jecel yihiin, maadaama ay u badan tahay inay qaataan waxay jeclaystaan. Koofiyada si sax ah ha loo rakibo inta dukaanka la joogo.

Dhaqaalaynta koofiyada

Xaallada koofiyadu waa in ay ahaataa mid wanaagsan si ay u xafido qofka baaskiilka wada, waana in koofiyada si joogto ah loo eegaa inay wax qabto. Koofiyadaha meelahaas la iskaga tuuro ama aan la daryeelin waxaa laga yaabaa in la bedelo. Koofiyada waxaad ku dhiqi kartaa biyo iyo saabuun khafiifa, laakiin ha isticmaalin waxyaallaha kale ee wax lagu dhaqo maadaama laga yaabo inay dhibaato u geysanayaan koofiyada.

Dharka la gashanayo

Baaskiiladu waa yar yihiin marka la dhinac dhigo gaadiidka kale oo wadada maraya waana adag tahay in la arko. Sababtaan darteed waa in ilmaha iyo dhamaan qoyska intiisa kale lagu dhiirigeliyo inay qaataan lebis aad u muuqda markay baaskiilka wadaan.

Waa la gashadaa kaba xiran oo jaantooda hoose aanay siibanayn kuwaas oo dhulka qabsanaya. Xargaha kabaha waa in la xiraa. Amaan maaha in baaskiilka lagu wado kaba la'aan, dacas ama saandal.



Fikradaha xarakaadyada qoyska

- Ku dhiirigeli carruurta inay hubiyaan koofiyadaha ay leeyihiin xubnaha qoysku, taas oo ku salaysan waxay ka barten Barashada Baaskiilka (Bike Ed). Ka caawin inay hindisaan shahaadada amaanka si loo siiyo qof walba oo koofiyad leh qoyskana ka tirsan.
- Adiga oo internetka isticmaalaya, samay mashruuc cilmi baaris ah oo ku saabsan koofiyadaha baaskiilka, wixii muhiim u ah, horumarkooda iyo sida ay u caawimaan baaskiil wadaha marka shil dhaco.
- Qof walba oo qoyska ka mid ahi go'aan ha ka gaaro dhar midab muuqda ah leh oo uu qaato mar walba oo uu fuullo baaskiilka.
- Isku raaca xeerka baaskiil wadida oo ah: 'koofiyad la'aani waa baaskiil la'aan'!

Tusaalayaasha amaanka

Ka hoos qaadashada koofiyada yar koofiyada baaskiilka waxay wax yeelli kartaa sida koofiyadu kuu le'eg tahay waxayna hoos u dhigtaa waxtarkeeda marka shil dhaco

Dadka baaskiilka wada si sahala ayaa loo arki karaa haddii ay qabaan lebis midabkiisa aad loo arki karo.



Websaytyada

Macluumaad intaas ka badan booqo:

www.virtualbike.com.au

www.vicroads.vic.gov.au

www.goforyourlife.vic.gov.au



Tusaalayaasha amaanka

Ilaali lugtaada markaad baaskiilka wadayso. Ha ku wadin kaba la'aan, dacas ama saandal.

Gasho koofiyad mar kasta oo aad baaskiil wado. Koofiyaduhu waxay ka xafidaan baaskiil wadayaasha dhaawaca madaxa waxayna samayn karaan nabadgelyayn.



Ku wadida dhabada- si amaana ula wadaagida kuwa kale

Waxaa jira meella badan oo lagu wado baaskiil meel wadada ka baxsan, sida dhabooyinka lagu socdo, dhabooyinka baaskiilka, meella lagu lugaynayo oo la wadaagayo iyo wadiiqooyinka kaymaha ku dhexyaalla. Meelaha noocaan ah dad aad u badan ayaa u isticmaala siyaalla kala duwan, sidaas darteed ilmahaagu wuxuu u baahan yahay inuu barto sida loola wadaago dhabada kuwa kale oo isticmaalaya.

Iyada oo qayb ka ah barnaamijka Barashada Baaskiilka (Bike Ed) carruurta waxay bartaan u wadida baaskiilka si amaana, la socodka khatarta iyo la qaybsiga dhabooyinka dadka kale. Shilal badan oo carruuri ku lug leedahay ayaa ka dhaca wadada banaankeeda, halkaas oo carruurta aaminsan yihiin inay aamin tahay. Marka carruurta baaskiilka la wadaan saaxiibadood, feejignaantoodu waxaa laga yaabaa inay xun tahay dabeecadooda baaskiil wadiduna aanay aamin ahayn. Ku dhiirigeli ilmaha inuu u dhaqmo si masuulnimo ah naftoodana ka fekeraan, balse aanay iskala socon kooxda.

Ixtiraamka dhabooyinka

Marka lagu wadayo dhabada waxaa jira shuruuc loo baahan in la raaco amaanka qof walba darteed:

- raac dhinaca bidix oo wadada
- xoog ha u wadin baaskiil ama ha samayn wax aan la filanayn
- kuwa kale u sheeg inaad ku soo socoto adiga oo u digaya, sida isticmaalka ganbaleelka ama la hadlaya
- Sii wadada dadka lugta ah
- Adeec calaamadaha dhabada kuna wad hal layn, khaasatan meelaha la wadaagayo
- ku wada laba-labo marka dhabadu ay ballaaran tahay ayna amaan tahay

Khatarta dhabooyinka

Waxaa jira khatara badan oo ay tahay inaad la socoto. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara:

- kuwa kale oo dhabada isticmaala – aad uga taxadar carruurta yaryar ama dadka waaweyn
- eey-yada iyo xayawaanka kale
- meelaha guriga laga galo ama laga soo baxo, wadiiqada ama meelaha dhabadu ka goyso wadada
- khatarta sida dusha dhabada oo is bedesha, taagaga, meel yar oo biya fadhiyaan, godadka, geesaha aan wax laga arkin iyo galaasyo jaban.

Haddii ay tahay in wado la gooyntayo, baaskiil waduhu waa in uu istaagaa, ka dego socodna ku gooyo.



Tusaalayaasha amaanka

Iska ilaali dhulka dushiisu aanay sinayn, sida meel quruurux leh taas oo leh dhooqo ama qoyan, maadama kuwaani sabab u yihiin dhaawacyada soo gaara baaskiil wadayaal badan.

Baaskiil waa gaadiid. Baaskiil waduhu wuxuu leeyahay isla masuuliyadii sida isticmaalayaasha kale ee wadada.



Meelaha lagu wado baaskiilka

Carruurta ka yar 12 sanadood waxaa laga yaabaa inay ku wadaan dhabada la maro, sidoo kale waxaa iyaguna ku wadi kara dadka waaweyn haddii ay kormeerayaan ilmaha ka yar 12 sanadood oo baaskiilka wada. Baaskiil wada-yaasha jira 12 sanadood ama ka weyn waxay ku wadi karaan dhabada ama wadada.

Dhabada socodka waxaa loogu talagalay in lagu socdo dadka baaskiilada wadaana waxaa waajiba inay aad uga taxadaraan markay baaskiilada ku wadaan. Dadka baaskiilka wada waxaa ku waajiba inay xaqiijiyaan inay bidixda qabsadaan wadadana siiyaan dadka lugaynaya oo haya dhabada, wadiiqada ama meelaha dhabadu ka goyso wadada. Waalidiinta/daryeellayaasha waxaa waajiba inay kala hadlaan carruurta khatarta.

Wadajir u kaxaynta baaskiilka

Carruurta waxay noqonayaan kuwa aad ugu fiican wadida baaskiilka haddii waalidka/masuulku si firfircoon ay ula wadaan baaskiilka carruurta kana caawimaan inay xirfad yeeshaan. Marka waalidka/masuuliyiintu la raacaan carruurta tusaana dabeecada amaanka ah saxdana ah, waxay ka dhigaan xarakaadka mid ah fursad waxbarasho oo qiima leh.





Fikradaha xarakaadka qoyska

- Hab fiican oo lagu layliyo xirfadaha carruurta baratay waa in la qorsheeyo wadid iyada oo la isticmaalayo dhabooyinka. Da'daal samay. Aad meel cusub oo leh waxyaalla la xiiseeyo si aad u aragto una sahamiso. Wada kaxaysta baaskiilo qoys ahaan dibadana u baxa. Waxaa fiican in carruurta laga joogo gadaal iyo horay marka la wada socdo.
- Baaskiil qoyska la wad, adiga oo isticmaalaya dhabooyinka istaagna si aad uga wada hadashaan khatarta dhici karta oo aad fili kartaan inay ka dhacdo horay. Tilmaama wadada guryaha gasha, wadiiqada ama meelaha dhabadu ka goysa wadada. Ka hadal waxa tani u keeni karto baaskiil wadayaasha, khataraha suurtagalka ah iyo sidii wax looga qaban lahaa xaalladahaan si amaana. Ku dhiirigeli dabeecada suuban kuwa kale ee dhabada isticmaalaya (isticmaal macluumaad tusahaan).

Tusaalayaasha amaanka

Shilka baaskiilku meel walba ayuu ka dhici karaa, ama wadada ama wadada banaankeeda, sidaas darteed xaqiiji in ilmahaagu mar walba qabo koofiyad markaad baaskiil wado.

Websaytyada

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan baaskiil ku wadida dhabooyinka booqo:

www.vicroads.vic.gov.au

www.bv.com.au

www.goforyourlife.vic.gov.au



Barashada si amaana ugu wadida wadada

Waxaa la soo jeedinayaa in carruurta ka yar 12 sanadood aanay ku wadin wadada iyaga oo aan qof weyni kormeerayn, maadaama ay weli yeellanayaan fahamka, xirfada iyo waaya-aragnimada wax lagaga qabto xaallada wadada. Dadka waaweyn kormeerkooda waa muhiim ilaa ilmuhu muujin karo kantaroolid wanaagsan oo baaskiil wadida, una dhaqmo si amaana markuu wado isla markaana muujiyo fahmida shuruucda wadada.

Liis-hubinta ku taalla bogga soo socda wuxuu caawin doonaa waalidiinta/daryeellayaasha si ay go'aan uga gaaraan in ilmahoodu diyaar yahay in uu kaxeeyo isaga oo aan qof weyni kormeerayn.

Hababka lagu caawimo diyaarinta carruurta si ay wadada ugu wadaan baaskiilka si amaana

Waxaa jira siyaalla badan oo lagu gaaro halkaad rabto. Qadari wadooyinka bidixda loo leexanayo marka la dhinac dhigo kuwa midigta loo leexanayo, ka fogow wadooyinka mashquulka ah isticmaalna dariiqyada saxmada yar ama dhabooyin haddii la helli karo.

Ka fogow habeen wadida khatarta ka iman karta darteed. Haddii ilmo habeen kaxaynayo baaskiil, xaqiiji in baaskiilku uu leeyahay nalka hore, nal dambe iyo kuwa iftiinka soo celiya. Xirashada dharka iftiinka soo celiya ayaa iyaguna siyaadin kara aragtida.

Markaad qoys ama koox ahaan u wada wadaan, wadada wadajir u haya. Haddii ay suurtagal tahay, qof weyni dadka ha hor kaco midna gadaal ha ka socdo.

Waalidiintu/daryeellayaashu waa inay xaqiijiyaan inay kula wadaan baaskiilka carruurtooda wadada sida ugu dhaqsaha badan, si ay ugu ogolaadaan carruurtooda inay laylis ku sameeyaan wadada. U samay adeegan ujeedo kale, sida ka soo gadida jaraa'idka ama caanaha dukaanka. Icticmaal boorsada dhabarka ama dimbiil ama wax lagu qaado qalabka.

Liiska-hubinta wadada aaminka ah oo lagu wadayo baaskiilka

Si loogu wado wadada si aamina baaskiil waduhu wuxuu u baahan yahay inuu:

- la xiriiro kuwa kale oo wadada isticmaalaya ujeedadoodana fahamo
- Hortaada fiiri & fiirina wadada iyo agagaaraha kugu wareegsan wixii khatar noqon kara
- ku soco wado toosan, kana fogow hal mitir qarka wadada ama baabuurta dhigan adiga oo aan u leexan midigta ama bidixda
- labada gacmoodba ku qabo shukaanta mar walba, aan ka ahayn markaad leexasho muujinayso
- qorshayso inaad ka fogaato meelaha saxmadu ku badan tahay doorona halka ugu amaansan
- masaafu ka fogow gaadiidka kale si aad u aragto laguuna arko
- Faham adeecna xeerarka wadooyinka
- xiro koofiyada la ansixiyey si sax ahna loo rakibay iyada oo dib loo samayn
- qaado lebis ku xafidaya kaas oo leh midab dhalaalaya isaga oo aan lagu celin
- u kaxay baaskiilka markaad la wado saaxiibo.

Xirfadahaan iyo aqoontaan waa la bartaa iyada oo qayb ka ah barnaamijka Barashada Baaskiilka. Si kasta ha ahaatee, waalidiintu/daryeellayaashu waa inay xaqiijiyaan in carruurta muujin karaan fahmina karaan qodobadaan. Waa inay (waalidka iyo carruurta) qaataan waqti ay kaga wada hadli karaan barashada xirfadahaan iyaga oo wadajira.



Tusaalayaasha amaanka

Ku dhiirigeli carruurta inay feejignaadaan una kaxeeyaan baaskiilka si amaana markay baaskiilka la wadaan saaxiibadood.

Samayso shuruuc waadax ah oo baaskiil wadida dhamaana qoyska oo dhami ogol yihiin.

Fikradaha xarakaadyada qoyska

- Baaritaan ku samay shuruucda wadada dhamaan gaadiidka adiga oo isticmaalaya internetka. Kala hadal arrintaan carruurtaada, iyo khaasatan kuwa doonaya inay ku wadaan wadada. Sameeya kadiska shuruucda wadada. Waxaad laga yaabaa inaad la yaabto.
- Qorshay wadada ugu amaansan oo dugsiiga loo mari karo ama saaxiibkaa gurigiisa. Waxaad sawiri kartaa khariidad waxaadna muujin kartaa khatar kasta si aad uga fogaato inaad socoto. La samay carruurtaada laylis ku saabsan marinka la qaadayo.
- Qorshe u samay qoyska si ay u aadaan jaho xiisa leh. Kani wuxuu noqon karaa ban-bax waxaana suurtagal ah inuu lug ku yeesho isticmaalida gaadiidka dadweynaha marka la socdo. Socodka dheer qaado dhalooyinka biyaha, cunto, iyo kareemka difaaca ilayska qoraxda. Qaado dhamaan qalabka dayactirka sida kitka bedelida taayirka, tuyuub siyaado ah iyo moobaylka si aad u adeegsato haddii wax dhacaan.
- Raadi meelaha bulshadu ku wado baaskiilka. Badanaa waxaa kuwaas lagu xayey siiyaa jaraa'idka iyo magaasiinada ama wargeysyada bulshada. Waa fursad aad u fican oo lagu barto xirfadaha wada ku wadida.



Websaytyada

Macluumaad intaas ka badan si aad u xaqiijiso amaanka qoyskaaga markaad wadada ku socoto booqo:

www.virtualbike.com.au

www.vicroads.vic.gov.au

Halka laga galo websaytka

VicRoads www.vicroads.vic.gov.au

Wuxuu ka kooban yahay macluumaad ku saabsan sharciga amaanka wadada ee baaskiil wadida wuxuuna leeyahay khariidaha marinada baaskiilka iyo dhabooyinka wadada Fiktooriya ka baxa ama aan ka bixin. Wuxuu kaloo qoraa tirakoobka shilalka, kuwaas oo ah online haya xogta tirakoobka shilalka dhamaan noocyada isticmaalayaasha wadada, kaas waxaa laga raadin karaa macluumaadka agtaada ku yaalla.

Go For Your Life www.goforyourlife.vic.gov.au

Macluumaadka amaanka baaskiil wadidu wuxuu ka kooban yahay, meesha lagu wado iyo khariidadaha shabakada baaskiilka Fiktooriya oo dhan.

Virtual Bike www.virtualbike.com.au

Booliiska Fiktooriya ayaa sameeyey websaytkaan si uu u bixiyo macluumaad u ogolaanaya baaskiil wadayaasha inay yeeshaan istaraatiijiyaha ku dhisan amaan, wax ku ool la taaban karo marka ay wadaan baaskiilka. Wuxuuna bixiyaa talada amaanka iyo amniga.

Bicycle Victoria www.bv.com.au

Bicycle Victoria waa urur bulsho oo loo hibeeyey inuu ku dhiirigeliyo dad badan inay baaskiil wadaan. Websaytka wuxuu ka kooban yahay talo iyo tusaalayaal la siinayo baaskiil wadayaasha, faahfaahinta munaasabado waditaan oo qaabaysan iyo halka lagala xiriirayo ururada iyo kooxaha baaskiilka.







arrive
alive

vic roads

VAPIN02027 01.09